

Sharciga amaahda af soomali

Ku soo dhowow maktabadda

Degmadda Kungsbacka waxaa ku yaala 6 maktabado:

Fjärås, Frillesås, Kullavik, Onsala, Åsa, Fyrens Bibliotek iyo bas buugaag sidda, baabuur buugaag sida iyo buuga wuu imanayaa (Boken kommer).

Kulligood waxaa ka dhexeeya telefoon nambarkan: 03000-838020 (codka dooro).

Maktabadda gudeheeda

Waxaad amaahan kartaa buugaag, joornaalo, muusigada, filimo, buugaagta elektroonigga, ciyaaro iyo warbaahin kale oo fara badan.

Waxyaabaha aad sameyn kartid waxaa ka mid ah cilmi baadhista abtirsiiimada, isticmaalka kombiyuutarka, akhriska joornaalka iyo koobi.

Bogga internetka bibliotek.kungsbacka.se

Waxaad sameyn kartaa: amaah mar labaad ah, amaah buugaagta elektroonigga, Sii dhigo, daawo warka, hel warbixin iyo warbixin bixi, isticmaal liiska casuusta, shahaado bixi, ku talli iib, eeg waxyaabaha dhacaya, eeg saacadaha ay furantahay.

Ku gal:

Kaadhka maktabadda + lambarka sirta ah ama

Taariikhda dhalashada + lambarka sirta ah

Kaadhka maktabada

Kaadhku waa waraaq qiimo leh waxaa loogu tala galay shaqsi kaliya in uu isticmaalo. Haddii uu kaa lumo kaadhku waa in aad xidhid. Adigu waa in aad beshid macluumaadkaaga iyo emailkaaga.

Marka aad codsanaysid kaadhka maktabadda waxaad ogolaanaysaa in la diwaan geliyo macluumaadkaaga. Sharciga ku saabsan arimaha sirta waxa uu ogolyahay in adiga uun lagu sheego wixii aad amaahatay. Ma dhiganayno wixii aad amaahatay.

Wakhtiyada amaahda

Ka warhay wakhtiyada oo is bedbedelaya waxayna ku xidhantahay waxaad amaahanaysid. Rasiidka waxaa ku qoran goorta aad celinaysid wixii aad amaahatay.

Kantarool in lagaa saaro wax walba markaad soo celisid.

Da' ayaa ku xidhan qaar ka mid ah warbaahinta.

Waa masuuliyaddaada in aad kantarooshid in waxaad amaahanaysid ay dhanyihiin oo aanay dhaawacnayn. Masuuliyaddu waa iskumid markaad soo celinaysid amaahda.

Buugaagta, buugaagta elektroonigga, muusigadda- cdiga ah, filimada xaqiiqda ah, musasaladda: amaah 4 wiig ah

Joornaaladda, ciyaaraha kombiyuutarka, ciyaaraha: amaah 2 wiig ah.

Filimada dvdga ah: amaah 1 wiig ah

Amaahyada soo daaha

Kadib maalinta ugu dambaysa waxaa lagu darayaa lacag dheerad ah maalin walba.

Kadib waxaa la soo dirayaa xasuus iyo warqada qaan-sheegadka (khidmadsaar malba oo la diro).

Lacaga aan la bixin waxaa loo gudbinayaa ururinta daynta.

Kaadhka maktabadda waa la xidhayaa ilaa la celiyo deynta/lacagta la bixiyo.

Khidmadda/lacag bixin

Kaadhkaaga maktabadda ee ugu horeeya waa bilaash, khidmad baa lagaa qaadaya haddaad mid kale u baahantahay.

Hadii aad goor dambe soo celisid waxaan qaadanaynaa lacag dheerad ah.

Waad ku khasbantahay in aad lacag ka bixisid wixii aad soo celin weydid ama aad dhaawacdid.

Qofkii diwaan geliyey email waxuu heleyaa xasuus. Adeeg dheerad oo ah in lagu soo xasuusinayo 3 maalmood ka hor amaahda inta ka dhiman.

Lacag dheerad oo ah 2 karoon maalin walba iyo warbaahin walba.

Lacag dheerad oo ah 20 kr filim walba iyo maalin walba.

xasuusta 1:aad 20 karoon.

xasuusta 2:aad 20 karoon.

warqada qaan-sheegada 40 karoon.

Masuul kama nihiin dhaawac ay warbaahinta aad amaahatid u geysato qalabkaaga.

Kombiyuutaradda

Kombiyuutaradu waa bilaash isticmaalkoodu waxaadna ku geleysaa kaadhkaaga maktabadda ama dhalashadaada + nambarka sirta ah.

Kombiyuutarkaaga shakhsiyeed hadii aad wadatid waxaad isticmaali kartaa internetka furan: guest.kungsbacka.se

